Siidaynta degdega ah

Xiriirka: Perry Cooper | Sarkaalka Sare ee Warbaahinta Dekedda Seattle

(206) 787-4923 | Cooper.p@portseattle.org

$2.5 Milyan oo khayraad lacageed oo Cusub ayaa loo Heli kara Fursad Dhaqaale ee Gobolka South King

Kooxaha ay bulshadu hogaamiso iyo kuwa aan faa'iido doonka ahayn ayaa hadda codsan kara maalgelinta Dekedda Seattle si ay u kordhiyaan fursadaha dhaqaale ee magaalooyinka ku hareeraysan Garoonka Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA). Wadar dhan $2.5 milyan ayaa la heli karaa iyadoo la bilaabayo wareegga afaraad ee Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaalaha ee Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee Gobolka South King (SKCCIF).

Hay'adaha waxay codsan karaan ilaa $100,000 hal sano oo maalgelin ah iyo $250,000 maalgelin sanado badan ah. Muddada codsigu waxa ay furan tahay hadda illaa Luuliyo 21, 2023.

Dekadda ayaa sidoo kale maanta ku dhawaaqday lix hay'adood oo heli doona lacag dhan $1.3 milyan oo doolar iyadoo loo marayo wareegga saddexaad ee barnaamijka soo kabashada dhaqaalaha ee SKCCIF. Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaale waxa uu isku xidhaa bulshooyinka Gobolka South King ee baahida ugu wayn u qaba fursadaha shaqo ee mushaarka fiican leh iyo tababarida marka aanu qorno jiilka soo socda ee xirfadlayaasha warshadaha la xidhiidha Dekedda, oo ay ku jiraan duulista, badda, ganacsiga dhismaha, iyo warshadaha mihnadaha cagaaran.

"Sidaa darteed qoysas badan ayaa wali la kulma hubanti la'aan dhaqaale iyo dhibaato - waxay wali raadinayaan sidii aay uga so kabsani lahaayeen Covid-19," **waxaa yiri gudoomiye ku xigeenka komishanka dekedda Seattle Toshiko Grace Hasegawa.** "Barnaamijkan soo kabashada dhaqaalaha waxa uu hubinayaa in fursadaha horumarinta dhaqaaluhu ay gaadhaan bulshooyinka kala duwan oo aay hagaajiyaan hagayaasha shaqada ee Dekedda."

"Iyada oo loo marayo iskaashi siman, Dekeddu waxay u abuureysaa fursado dhaqaale bulshooyinka si nidaamsan looga saaray fursadaha," **ayay tiri Guddoomiyaha Dekedda Seattle Xamdi Maxamed.** "Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaale ee Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee Gobolka South King wuxuu ka dhigayaa tayada, shaqooyinka mushaarka qoyska mid aay heli karaan bulshooyinkanka wuxuuna kobciyaa dhuunta shaqaalaha ee warshadaha la xidhiidha Dekedda."

**Isku xirka warshadaha dekeddaha la xiriira**

Iyada oo Xidhiidh la leh dhammaan qaybaha dhaqaalaha muhiimka ah ee Washington iyo isku xidhka in ka badan 500 loo-shaqeeyayaasha ee ka hawlgala xarumahayaga, Dekeddu waxay si gaar ah u taagan tahay inay gacan ka geysato abuurista dhuumaha shaqooyinka mushaharka fiican leh ee faa'iido u leh bulshooyinka ay sida aadka ah u saameeyeen hawlaha Dekeddu. Maalgelinta horumarinta xoogga shaqadu waxay hadda leedahay muhimad gaar ah maadaama warshado badan oo la xiriira Dekedda ay sii wadaan inay la kulmaan yaraanta shaqaalaha. Mashaariicda bulshadu hogaamiso waxay ka caawinayaan ka qeybqaatayaashu inay helaan xirfadaha, khibrada, iyo waxbarashada ay ugu baahan yihiin inay ku kordhiyaan mushaharka shaqooyinka iyo qoyska ee balaadhan ee Dekada iyo warshadaha la xidhiidha.

Wareega koowaad iyo labada ganacsi ee qaataha ah ee soo afjaraya addoonsiga iyo ka ganacsiga (BEST) waxay u adeegaan ka badbaadayaasha tahriibinta dadka iyo dhalinyarada khatarta ku jirta ee ku nool Gobolka South King. Ururku waxa uu taageeraa fursadaha dhaqaale isaga oo bixiya tababaroada u diyaarinta shaqada, kaalmaynta loo shaqeeyayaasha ee warshadaha la xidhiidha Dekedda, iyo abuurista layliyada mushaarka leh iyo fursado shaqo kuwa ka badbaaday tahriibinta dadka iyo dhalinyarada khatarta ku ah garoonka diyaaradaha iyo warshadaha la xidhiidha Dekedda.

"Marka ugu horraysa ee badbaadayaashu ka tagaan kii ka ganacsanaayay, badbaadadu waxa loo baahanyahay inay noqoto mudnaanta koowaad. Laakin ka dib markii lagu xiray guriyeyn deg-deg ah oo baahiyahooda aasaasiga ah la daboolay, badbaadayaashu waxay u baahan yihiin shaqooyin si ay dib ugu dhistaan noloshooda," **ayay tidhi Hannah Farkas, Agaasimaha Barnaamijyada ganacsiyada aan faa'iido doonka ahayn ee soo afjaraya addoonsiga iyo ka ganacsiga (BEST).** "Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee Port ee Gobolka Seattle South King waxay si weyn u xoojisaa awoodeena aan ku bixinayno fursadaha shaqo ee la siinaayo ka badbaadayaasha ka ganacsiga dadka ee warshadaha la xidhiidha Dekeda."

Qaataha Wareega labaad ee Latino Civic Alliance ayaa sheegay in maalgelinta dekeddu ay ka caawisay hay'adda in ay bixiso wacyigelinta Latinos ee aan hore u helin barnaamijka horumarinta xoogga shaqada iyo barnaamijka tababarka ka hor.

"Maalgelinta dekeddu waxay noo ogolaatay inaan si wadajir ah ula shaqeyno dhalinyarada iyo qoysaskooda si aan u barano aqoonta, qiimaha, iyo faa'iidooyinka mushaharka lagu noolaan karo iyo barnaamijyada tababarka iyo sida tani ay qoysaska uga beddesho saboolnimada," **ayay tiri Marie Bravo, Horumarinta Kheyraadka iyo Agaasimaha Maamulka ee Isbahaysiga Madaniga ah ee Latino.**

**Qaatayaasha wareegga saddexaad**

Ilaa hadda, 21 ka mid ah ururada Gobolka South King waxay maalgelin ku heleen wareegyada koowaad, labaad, iyo saddexaad ee Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaalaha ee SKCCIF.

Veronique Facchinelli, oo ah Agaasimaha Barnaamijka Bulshada oo leh wareeg saddexaad oo qaata, Casa Latina, ayaa sheegtay in maalgelintu ay u oggolaan doonto ururka inuu bixiyo tababaro iyo adeegyo lagu kordhinayo fursadaha dhaqaale ee bulshooyinka ay taageeraan.

"Waxaan rajeyneynaa in maalgelintan ay awood u siin doonto xubno badan oo ka mid ah bulshada soogalootiga Latinx inay helaan shaqooyin waaweyn oo leh mushahar nololeed iyo dariiqa shaqo ee warshadaha la xiriira Dekedda (ganacsiga dhismaha, shaqooyinka laga shaqaynaayo deegaanka ee cagaaranka laga dhigaayo iyo kuwa kale)," ayuu yiri Facchinelli. " Waad ku mahadsan tahay maalgelintan, Casa Latina waxay awood u yeelan doontaa inay la xidhidhaan bulshada Latinxiyaga oo siinaayo tababaro ku habboon, tixraac waxayna ka caawin doontaa inay maraan dariiqyada kala duwan ee barnaamijyada tababarka ka hor iyo ganacsiga. Tani waxay u sahlaysaa bulshadu inay helaan xirfado ku filan oo ay ku dalban karaan shaqooyinka la xidhiidha Dekedda."

Wax badan ka baro kooxaha ka helaya maalgelinta wareegga saddexaad ee Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaalaha iyo mashaariicdooda:

**Rugta Ganacsiga Afrika ee Waqooyi-galbeed ee Baasifigga (ACCPNW)**

ACCPNW's Mashruuca Taageerada Ganacsiga ee Drayage Trucking Trucking Business (ADT-BUS) Waxay siin doonaan taageero farsamo ganacsi darawaliinta si ay uga caawiyaan ganacsigooda xamuulka inay

badbaadaan oo ay koraan; in la baro maamulka ganacsiga yar yar si loo hubiyo in ganacsatadda ganacsiga xamuulka ee u adeegaya xarumaha Dekadda ay si guul leh u maamulan karaan ganacsigooda.

**BIPOC Apostrophe**

BIPOC Apostrophe waxay ku tababartaa dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 18-25 jir dhinacyada maaraynta xamuulka diyaaradaha, xarumaha saadka iyo hawlaha bakhaarka, iyo hagintaanka diyaaradaha.

**Naadiyada Wiilasha iyo Gabdhaha ee Gobolka King**

Naadiyada Wiilasha iyo Gabdhaha ee barnaamijka YouthForce ee Gobolka King, oo ay iskaashanayaan 7GEN iyo SIXR, waxay ku xidhi doonaan dhalinyarada dhaqaale ahaan nugul ee ka soo jeeda bulshooyinka madaarka u dhow si ay u helaan tababar horudhac ah iyo dariiqo tababar oo ku saabsan tignoolajiyada cagaaran iyo wax soo saarka horumarsan.

**Casa Latina**

Barnaamijka dhismaha ee Casa Latina wuxuu ku dhismaa khibrad qorista, tababarka, iyo hubinta in shaqaalaha Latino ay leeyihiin xirfadaha iyo tababarka loo baahan yahay si ay shaqooyin uga helaan warshadaha dhismaha. Barnaamijkan waxa ku jira maaraynta kayska iyo adeegyada duubista si loo taageero ragga, haweenka, iyo dhalinyarada.

**U adeeg Itoobiyaanka**

U adeeg Itoobiyaanka barnaamijka bilawga ah ee cusub wuxuu bixiyaa wacyigelin iyo shaqaaleysiin loogu talagalay wadaaga raaca BIPOC ee soogalootiga ah iyo darawallada tagaasida si ay u sii wataan xirfad ahaan makaanik diyaaradeed ee madaarka SEA oo ay uga qaybgalaan koorsada (Hordhaca Farsamada Dayactirka Duulista Hawada, "Introduction to Aviation Maintenance Technology) (AMT)" oo ay bixiso Jaamacadda Madaarka.

**Lacagtaada ayaa ah mid muhiim ah oo u baahan latalin**

Ka qaybgalayaashu waxay heli doonaan xirfadaha dhismaha, kartida, waayo-aragnimada, iyo waxbarashada si ay u sugaan shaqooyinka warshadaha dhismaha iyagoo bixinaya waxbarasho iyo taageero latalin ah iyada oo loo marayo hordhaca barnaamijka tababarka dhismaha. Ka-qaybgalayaashu waxay heli doonaan shahaado hawsha duminta iyo burburinta.

Dekeddu waxay sii waddaa inay bixiso abaal-marin sannado badan ah oo ay siiso codsadayaasha mashaariicda u dhexeeya $100,000 hal sano iyo ilaa $250,000 maalgelin sannado badan ah. Maalgelinta sannadaha badan waxay u oggolaanaysaa ururrada inay maalgashadaan qorshaynta iyo hirgelinta muddada dheer oo ay kordhiyaan saamaynta maalgashiga bulshada ee Dekedda.

Laba iyo toban urur ayaa sii wada shaqada mashaariicda soo kabashada dhaqaalaha iyada oo loo marayo ikhtiyaarka maalgelinta ee sanadaha badan. Wax badan ka baro bogga Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaale ee Saamaynta Saamaynta Bulshada ee Gobolka South King.
https://www.portseattle.org/programs/south-king-county-community-impact-fund-economic-recovery-program

**Habka codsiga wareegga 4**

Ma haysaa mashruuc leh natiijooyin la xidhiidha horumarinta xoogga shaqaalaha, shaqo abuurka, ama horumarinta dhaqaalaha warshadaha la xidhiidha Dekedda? Codso maalgelinta Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaalaha.

Si aad u codsato maalgelin, buuxi Go'aanka U-qalmitaanka Luuliyo 21, 2023 Raadi macluumaad dheeriya oo khuseeya nidaamka codsiga, agabka codsiga, iyo mashaariicda hore loogu deeqay>

https://www.portseattle.org/programs/south-king-county-community-impact-fund-economic-recovery-program

**Faahfaahinta muhiimka ah**

- Ururadu waxay codsan karaan ikhtiyaarada maalgelinta ee hal mar iyo kuwa mararka badan labadaba
- Maal-gelinta wuxuu ku martiqaadayaa soo jeedinta mashaariicda la xidhiidha horumarinta xoogga shaqada, barnaamijyada shaqo abuurka, ama xalalka soo kabashada dhaqaalaha ee warshadaha ee la xiriira Dekedda
- Mashruucyadu waa inay fa'ido kuso kordhiyaan Gobolka South King
- Mashruucyadu waa inay u adeegaan kuwa dhaqaale ahaan nugul, oo ay ku jiraan dadka midabka leh, dadka asaliga ah, soogalootiga iyo qaxootiga, Bartayaasha Ingiriisiga, halyeeyada, waayeelka, dhalinyarada, iyo/ama dadka qawo baahiyaha gaarka ah ee naafada ah
- Ururada bulshada, rugaha ganacsiga, iyo ururada kale ee aan faa'iido doonka ahayn ee ka shaqeeya aagagga barnaamijkan ayaa xaq u leh inay codsadaan
- Shaqaalaha dekeddu waxay martigelin doonaan kulammo macluumaad ah si ay u taageeraan codsadaha iyada oo loo marayo habka codsiga

**Ku Sahabsan Saameynta Maalgalinta Bulshada Degmada South King**

Dekadu waxay asaastay Maalgalinta Saameynta Bulshada ee Gobolka South Kung sanadka 2019 si loo kordhiyo fursadaha bulshooyinka la dayacay, isir ahaan iyo dhaqaale ahaan kala duwan.SKCCIF waa hal qaab oo Dekadu uga shaqeyso hiigsigeeda soo-kabasho siman, deegaanka wanaagsan, iyo nolol tayo wacan leh.Maalgalinta waxay ku deeqi doontaa $10 milyan inta dhaxaysa 2019 iyo 2024. In ka badan 54 mashruuc ayaa helay maalgelinta SKCCIF tan iyo 2019, oo caawinaysa mashaariicda bulshadu hogaamiso inay midho dhalaan. In badan oo ka mida mashaariicdani waxay kordhiyaan caawimada codsiga shaqo ee bulshooyinka la dayacay iyo kuwa aan ku hadlin Ingiiriisiga, waxay u carbiyan barnaamijyada carbiska shaqo iyo xirfadaha bada, dhisida beeraha, nadiifiyaan goobaha dadweynaha, oo kordhiyaan waxbarashada deegaanka.

Codso Maalgelinta Soo kabashada Dhaqaalaha maanta> https://www.portseattle.org/programs/south-king-county-community-impact-fund-economic-recovery-program